JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadkii 11aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 26/03/2022 |
|---|---|---|



# XEERKA KALA XADAYNTA GANACSIGA
## XEER LR.26/2004


Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com


Sannadka 2022

Lama iibin karo
Not for sale

L49/2

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-0096/022004 DATE 09/02/04

## DECREETO MADAXWEYNE NO: 013/022004

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.**

Markuu helay: Go'aankii GW ee Lr: GW/KF-21/316/2004 ee 12/01/2004 uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay Xeerka kala Xadaynta Ganacsiga Xeer No: 26/2004 iyo Go'aanka ansixinta Golaha Guurtida Lr: GG/Kal-fahdi-23/G-3/2004 ee 24/01/2004.

Markuu arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo saarayaa**

**Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Xeerka kala Xadaynta Ganacsiga Xeer No: 26/2004.**

***Waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.***

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Jamhuuriyada Somaliland

**GOLAHA WAKIILADA**

*Xarunta, Hargeysa*

Republic of Somaliland

**HOUSE OF REPRESENTATIVES**

*HQ, Hargeisa*

*Our ref:* GW/Kf-21/316 /2004

*Date:* 12/01/04

## GO'AAN ANSIXIN XEERKA KALA XADAYNTA GANACSIGA (Xeer No. 26/2004)

## GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay:** Qodobka 11 (2)aad ee Dastuurka oo si cad u qeexaya-"in aanu habka dhaqaale noqonin mid horseeda in barwaaqadu ku koobnaato ama ku ururto koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan wax haysan."

**Markuu dareemay:** baahida loo qabo xeer suura galiya mabaadiida Dastuurku u jideeyay xaqiijinta xuquuqda cadaalad qaybsiga bulshada ee dhinacyada adeegyada iyo fursadaha dhaqaalaha.

**Markuu dhagaystay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga Iyo Wershadaha oo u xil saaran abuuritaanka himilooyinka horumarinta dhaqaale iyo fur-furidda irridaha Ganacsiga wax iswaydaarsiga ee dalkan J/Somaliland.

**Markuu u Codeeyay:** ansixinta Xeerka Kala Xadaynta Ganacsiga, fadhigii 12/01/2004, oo ay goob-joog ahaayeen 51 Xubnood oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada

### Wuxuu

**Cod aqlabiyad ah (40 cod) oo gacan tag ah ku ansixiyey Xeerka Kala Xadaynta Ganacsiga (Xeer No. 26/2004). Halka 1 Mudane ka diiday, 9 Mudane oo kalena ka aamuseen, Gudoomiyuhuna aanu codayn sida u caadada ahayd.**

**Allah Mahad Leh,**

**Maxamed Xuseen Cisman**
**Xoghayaha Guud, G/Wakiilada**

**Axmed Maxamed Adan**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada**

Jamhuuriyadda Somaliland

GOLAHA WAKIILADA

# XEERKA KALA XADEYNTA GANACSIGA (xeer No. 26/2004)

## GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay:** Qodobka 11 (2) aad ee Dastuurka oo si cad u qeexaya-"in aanu habka dhaqaale noqonin mid horseeda in barwaaqadu ku koobnaato ama ku ururto koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan wax haysan."

**Markuu dareemay:** baahida loo qabo xeer suura galiya mabaadiida Dastuurku u jideeyay xaqiijinta xuquuqda cadaalad qaybsiga bulshada ee dhinacyada adeegyada iyo fursadaha dhaqaalaha.

**Markuu dhagaystay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga Iyo wershadaha oo u xil Saaran abuuritaanka himilooyinka horumarinta dhaqaale iyo fur- furidda irridaha Ganacsiga wax iswaydaarsiga ee dalkan J/Somaliland.

## WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

Qodobka 1aad:

a) Ganacsadaha wax soo Dejiya waxna Dhoofiya (Importer and Exporter Trader).

b) Ganacsadaha wax soo Dejiya (Importer Trader).

c) Ganacsadaha wax Dhoofiya (Exporter Trader).

d) Ganacsadaha Jumlad laha ah (Wholesaler Trader).

e) Ganacsadaha Tafaariiqlaha ah (Retailer Trader).

Qodobka 2aad:

Eray Bixin

**b) Gancsadaha waxa soo Dejiya waxna Dhoofiya (Importer and Exporter Trader):**

Waxaa loola jeedaa Ganacsadaha Badeecad Dhoofiya ee haysta Liisanka wax soo Dejinta iyo Dhoofinta.

**t) Ganacsadaha wax soo Dejiya (Import Trader)**

Waxaa loola jeedaa Gancsadaha wax soo Dejiya ee haysta Liisanka soo Dejinta Badeecada ama Alaabada.

**j) Gancsadaha waxa Dhoofiya (Export Trader):**

Waxaa loola jeedaa Ganacsadaha wax Dhoofiya ee Liisan u haysta in uu Badeecad/Alaab Dhoofiyo.

**x) Ganacsadaha Jumladle (Wholesale Trader):**

Waxaa loola jeedaa ganacsadaha wax ka iibsada Ganacsadaha waxa soo Dejiya (Import Trader) ama Ganacsadaha waxa soo Dejiya waxna Dhoofiya (import and Export Trader).

**Kh) Ganacsadaha Tafaariiqlaha (Retail Trader):**

Waa Ganacsadaha haysta shatiga Dowladda Hoose ee wax ka soo iibsada Ganacsadaha Jumladlaha ah, kuna sii iibiya Tafaariiq.

Qodobka 3aad

Ganacsiga Gudaha waxa uu noqonayaa nooc kasta oo Gancsi oo ku sugan Dalka gudihiisa ama xuduudaha Dalka.

Qodobka 4aad.

Ganacsiga Gudaha iyo Ganacsiga Jumladlaha ah waxa lagu kala iibsan karaa lacagta Dalka (Legal-tender to all Public & Private Sector) Somaliland Shilling.

Qodobka 5aad

Ganacsiga Jumladlaha (Whole saler) waa ganacsiga u dhaxeeya wax soo Dejiyeyaasha ama keenayaasha Debada iyo Jumladlayaasha.

Qodobka 6aad

Ganasadaha Jumladlaha alaabta uu keeno kuma iibin karo Tafaariiq ahaan sida Ganacsadaha Tafaariiqlaha ah.

Qodobka 7aad

Ganacsaduhu Sanad kasta dhamaadkiisa waa inuu Wasaaradda Maaliyadda ka buuxiyaa Foomka koobida Hantidiisa bixiyana Macaashalmacaashka ku waajibay ee Wasaaradda Maaliyadda. (Tax Clearance Certificate)



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR ... OFFICE

## Qodobka 8aad

Ganacsadaha Tafaariiqlaha ahi ama Macdaarlaha waa Ganacsadaha u dhaxeeya Ganacsiga Jumladlaha Macaamiisha.

## Qodobka 9aad

Ganacsadaha Jumladlahaha wuxuu qaadanayaa Liisanka Ganacsiga Jumladaha, wuxuuna ka qaadanayaa wasaaradda Ganacsiga Liisanka Derajada B.

## Qodobka 10aad

Ganacsadaha waxa soo Dejiya (Import Trader) ama waxa Dhoofiya (Export Trader) ama wax soo Dejiya waxna Dhoofiya (Import & Export Trader) waxa uu qaadanayaa Liisanka Gancsiga ee Derajadda A oo uu ka qaadanayo Wasaaradda Ganacsiga iyo Wershadaha.

## Qodobka 11aad

Ganacsadaha Tafariiqlaha ah ee xabada ama kiilo-garaamka iibinayaa wuxuu qaadanayaa Shatiga Dawladda Hoose ee Gancsadaha Tafaariiqlaha ama Macadaarlaha.

## Qodobka 12aad

Ganacsade ma wada qaadan karo Liisanka Ganacsiga Jumladlaha Guud iyo Tafaariiqle.

## Qodobka 13aad

Ganacsadaha Xeerkan jabiya waxaa la marinayaa ciqaabta hoos ku qoran: -

b) Marka hore waxaa loo gudbinayaa Digniin qoraal ah.

t) Marka labaad waxaa la ganaaxayaa lacag dhan SL.SH 10.000.000/= ilaa

15.000.000/=.

## Qodobka 14aad

Ganacsadaha jabiya Xeerkan laba jeer wixii ka dambeeya waxaa laga qaadayaa Liisanka loogu ogolaaday markii hore Inuu ku Ganacsado.

## Qodobka 15aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Madaxweynuhu saxeero, ansixinta Baarlamaanka dabadeed.

ALLAA MAHAD LEH

Maxamed Xuseen Cismaan
Xoghayaha Guud, G/Wakiilada

Axmed Maxamed Adan
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE